

# Ururka Carwo-faneedka Maindee

## Annagu ayaan nahay ?

Ururka Carwo-faneedka Maindee waa urur dadku u shaqeeyaan iskood. Waxaan isu ururiney 1997kii si aan kor ugu qaadno oo aan u xusno kala duwanaanshaha dadka ku nool iyo kuwa ka shaqeeya agagaarka Maindee oo ku taal Newport, South Wales. Waxaan qabanqaabinna Carwo-faneedka Maindee sannad kasta, oo la qabto bisha Luulyo, iyo barnaamij waxqabadyada ku lug leh farshaxanka beesha.

Guddigayaga waxa lagu doortaa sannad kasta shir guud oo la qabto bisha Noofember. Waxay ku kulmماan bil kasta Community House ama Guriga Beesha, Eton Rd. Xubnaha cusubina had iyo jeer gacmo furan yaa lagu soo dhaweyyaa..

Waxaan ku dhiirigalineynaa dadka ka tirsan beel kasta iyo dhaqan kasta iney ka soo qayb galaan Ururka. Ujeeddadayadu waa in aan dhisno buundooyin u dhexeeya beelaha kala duwan si loo xuso dhaqannada qani ah ee kala duwan ee Newport.

Waxaan sameynaa waxqabadyo farshaxan in aan isku keenno dadyowga ka soo jeeda kala duwanaanshaha qolooyinka, dhaqannada, da'da, dhul kala duwan ka imaadka, diin ahaan beelo kala duwanaanshaha..

Shirkayaga waxa lagu qabtaa afka Ingriisiga. Waan soo dhaweyneynaa dadka aan afka ingriisiga ku hadal, isla markaana waxaan ku dadaaleynaa intii karaan ah inaan turjumaan kuu helnno.

Eeg website-kayaga [www.maindee.org](http://www.maindee.org). waxaad ka heli kartaa marin lacag la'aan ah interenetka Maktabadda Maindee oo ku taal Chepstow Road, ama maktabad kale oo ku taal deegaanka.

Haddi aad u baahato akhbaar intaa ka badan, ama aad jeceshahay inaad ka qayb qaadato shaqdayada, aad ayaan ugu farxaynaa inaan war kaa helnno.

Maindee Festival Association, c/o Community House, Eton Rd, Newport NP19 0BL

Telefoon: 01633 762155 Emayl: [info@maindee.org](mailto:info@maindee.org)



MFA is grateful for the generous financial support from these four organisations